

## **Ka Ergisashada Hotspot-ka Wirelesska Springfield City Library**

Ku soo dhawoow ergisashada hotspot-ka wirelesska ah ee Springfield City Library!

Xubin kasta oo jirta *18 ama ka weyn oo haysta kaarka Maktabadda CW Mars oo saafi ah*. Isdiiwaangalinta xubinnimo ee maktabadda ayaa loo baahanyahay. Isdiiwaangalinta xubinnimo ee maktabadda ayaa loo baahanyahay. *Hotspot-yada ka waxaa lagu suurtageliyay joogtada ah ee ka timaada Magaalada Springfield iyo Springfield Library Foundation*

**Waa kuwan dhawr shay oo ay tahay inaad ogaato kahor inta aanad ergisan hotspot-ka:**

Dadka ergisanaya hotspot-ku waa inay jiraan 18 sanno waana in rikoodhkooda maktabaddu yahay mid saafi ah.

Kaliya hal hotspot ayaa qoyskii loo ogol yahay. Halkii hotspot waxa isticmaali karaa ilaa 10 aaladood oo ku xidhan.

Hotspot-yada waxaa la ergisan karaa ilaa 14 maalmood. Haddii aan hotspot-ka la soo celin, adeega waa la damin doona 3 cisho gudahood ka dib taariikhda ay ahayd in la soo celiyo aaladuna waxay noqon doonta mid aan la isticmaali karin.

Dib u cusboonaysiinta lama ogola. Mar haddii hotspot-yada loo baahan yahay in dib loo dejiyo inta u dhaxaysa deymaha, xubinta looma oggola inay isla markiiba dib u ergistaan isla hotspot-kii ay hadda soo wareejiyeen. Haddii waaxdu ay hayso hotspot-yo kale oo la helo karo wakhtigaa, xubintu waxay ergisan kartaa mid kale.

Hotspot-ka waa in laga ergistaa oo lagu soo celiyaa xafiiska qaybinta ee maktabadda. Fadlan si shaqsi ah ugu soo celi aaladda xubin ka tirsan shaqaalaha maktabadda oo ku celi isla goobtii aad ka ergisatay si looga saari kaarkaaga maktabadda looguna diyaariyo qofka xiga. HAKU ridin hotspot-ka sanduuqa lagu rido buugta.

Hotspot-yada waa in lagu soo celiyaa maktabadda asagoo wata xadhigiisa dabka, tilmaamaha, iyo shandada lagu qaado una shaqaynaya sidii lagugu siiyay. Xubinta lumisa shandada hotspot-ku uu ku yimi waxa laga qaadi doona ganaax dhan \$3, ganaax dhan \$20 waxa laga qaadi doona xubintii lumisa xadhiga dabka ama hotspot-ka laftiisa.

Inta uu qofku haysato, hotspot-ka waxaa ka masuul ah ergistaha. Ergistayaashu waxa ay u hoggaansami doonaan siyaasadda isticmaalka la aqbali karo ee intarneetka maktabadda markii ay isticmaalayaan hotspot-ka moobaylka. .Isku day kasta oo lagu doonayo in lagu beddelo setinka hotspot-ka waa mamnuuc waxaana laga yaabaa in ay keento in la waayo awooda ergisashada.

Hotspot-yada waa la faaf-reebay si atomaatik ah ayadoo la isticmaalayo faaf-reebka waxbarsho ee T-Mobile. Cida ergisanaysaa waxay dalban kartaa in laga bakhtiiyo faaf-reebka hotspot-ka marka ay qaadanaayaan aalada. Maktabaddu ma waydiin doonto sababta uu qofku u dalbaday in la bakhtiiyo faaf-reebka.

Hadii hotspot-ka uu waxyeeloobo, ama aanu shaqaynaynin, waxaad kusoo celisaa xafiiska qaybinta maktabadda oo waxa aad u sheegtaa nooca waxyeelada qof shaqaalaha ah.

Isticmaalayaasha hotspot-ka waxay interterka ka isticmaalayaan shabakadda T-Mobile, e maaha shabakadda maktabadda. Maktabaddu kama masuul aha wixii fayl, macluumaad ama macluumaadka shakhsi ahaaneed ee laga galo/gudbiyo iyada oo la adeegsanayo hotspot-ka.

Maktabadda ma saarna masuuliyada waxyeelada tooska ah, dadban ama cawaaqib ee la xidhiidha isticmaalka hotspot-ka la qadan karo, oo ay ku jirto waayitaanta macluumaadka, ama sirtaada la jabsado. Dadka isticmaalaya hotspot-yada wixii khatar ah ee ka timaada iyaga ayay saaran tahay oo wixii khasaare ah iyaga ayaa ka masuul ah ficiladooda.

Ficilka sharci darada ah ee agabka Maktabadda ama adeegyada waxaa sidoo kale ka iman karta ciqaab maxkamadeed.

#### Isticmaalida Hotspot-ka:

- Daar hotspot-ka adiga oo isticmaalaya badhanka daaridda ee dhinaca kaga yaal hotspot-ka.
- Daaqada akhriska ayaa soo saari doonta fariin soo dhawayn ah oo muujinaysa inuu daaranyahay
- Raac tilmaamaha si aad u adoo galinaya magaca shabakadda maktabadda iyo baaswoodhka
- Waxaad ka heshaa shabkadda aaladaada ka dib dooro – Marka uu ku waydiiyo, geli baaswoodhka
- Marka aanad isticmaalaynin, bakhtii hotspot-ka adiga oo riixaya, oo haynaya, badhanka shiditaanka.

*Xasuuso inaad dabaysato hotspot-ka si aad u xaqiijiso in aad isticmaali karto marka aad doonayso inaad gasho aaladaada. Si aad u dabaysato hotspot-ka, waxa aad gelisaa xadhiga dabka hotspot-ka oo waxa aad gelisaa fiishta. Daaqada soo baxaysa ayaa sheegeysa inta ay marayso dabaynta baytarigu.*

**Mushkilado? Wixii taageero farsamo ah ee ay bixiso T-Mobile waxaad ka heleysaa: (844) 341-4834.**

*Dib loo eegay Janaayo 2024*

**Gaar u ah Shaqaalaha**

**Taariikhda soo celinta:** \_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

Magaca Ergistaha: \_\_\_\_\_ Telefoon # \_\_\_\_\_

Lambarka Kaadhka Maktabadda ee Ergistaha: \_\_\_\_\_

Cinwaanka Iimaylka Ergistaha: \_\_\_\_\_

Cinwaanka Ergistaha: \_\_\_\_\_

Ergistuhu wuxu qaatay **Hotspot-ka** # \_\_\_\_\_ leh baarkoodhka #: \_\_\_\_\_

Faab-reebka laga damiyay \_\_\_\_\_

Saxeexa Ergistaha: \_\_\_\_\_ Taariikhda: \_\_\_\_\_

**Taariikhda ergisashada** \_\_\_\_\_ **Xarfaha U Horeeya ee Magaca Shaqaalaha** \_\_\_\_\_

**Taariikhda soo celinta** \_\_\_\_\_ **Xarfaha U Horeeya ee Magaca Shaqaalaha** \_\_\_\_\_